Erayga iyo Maanta Somtwt 0172

Hoosheeca

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqli jirteen saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **Hoosheeca.** Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda, Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Bawlos. Sii dhegayso barnaamijka ka hadlaya **Hoosheeca.** Balse intaynaan idiin billaabin aynu wada dhegaysanno qasiiddadan.

Song: Reel---Cut----

Meelo badan oo ka mid ah kitaabka Qodduuska ah ayaa guurka ninka iyo naagta lagu masaalayaa xiriirka Ilaah iyo dadkiisa ka dhexeeya. Axdigii Hore markaad eegto ayaa sharraxaadan lagu matalayaa dhacdo qabsatay nebi Hoosheeca iyo xaaskiisa. Ilaah ayaana nebiga ku amray inuu naagtaas iyada ah guursado.

Hoosheeca 1:2 ayaa waxay leedahay:

"Rabbigu markuu Hoosheeca markii ugu horraysay la hadlay, wuxuu Rabbigu Hoosheeca ku yidhi, Tag, oo waxaad guursataa naag dhillo ah oo waxaad yeelataa carruur dhillo dhashay, waayo, dadka dalku Rabbigay ka fogaadaan sida naagu ninkeeda uga sinaysata."

Waa sharraxaad cajiib ah; waxaa lagu masaalay dhacdo adduun waxaana nebiga lagu amray inuu guursado naag aan daacad ahayn. Xaqiiqdii, dad bay la tahay inay naagaha jirkooda iibsada ahayd, oo la socon jirtay rag kale. Waxayna ku sii socotay dhilanimada xitaa markii nebigu guursaday kaddib. Caruurtii ay u dhashayna waxaa loo bixiyey

magacyo. Waxay ahaayeen magacyo astaan u ah daacad-darrada Israa'iil. Mid ka mid ah carruurta ayaa waxaa loo bixiyey magac turjumadu ay noqonayso, **"Kuwanu maahan dadygaka."** Mid kale oo ka mid ah carruurtana waxaa loo bixiyey, **tii la nacay.** Waxay magacyadaasu ahaayeen astaamo Ilaah u muuinayo sida uusan ugu faraxsanayn dadkiisa.

Waxay kaloo tilmaamayeen qoomamada Ilaah iyo caasinnimada Israa'iil. Xaqiiqdii, tani maahan wax cusub. Isra'aiil mar kasta waxaa haysatay taag-darro, sababteedu tahay dabiicadda dembiga, oo inta Ilaah ka leexdaan ayey baadiyoobaan. Ilaahna mar kasta wuxuu u ahaan jiray Arijir Wanaagsan, sida Masiixuba noo sheegay, kaasoo loo soo diray idaha lumay.

Haddaba, markii aad eegto Qorniinka, mar kasta oo ay baadiyoobaan, Ilaah wuu soo celin jiray Israa'iil. Haatan, Hoosheeca oo ahaa nebiga, ayaa u taagan Ilaah, naagtana waxay matalaysaa dadkii Ilaah. Ilaah ayey ku xirnaayeen dadka Israa'iil, xaalka Hoosheecana waa la mid; oo waxaa isaga iyo naagta u dhexeeyey cahdi rabbaani ah oo u dhexeeyey hoosheeca iyo xaaskiisa Goomer iyo Ilaah iyo dadkiisa.

Kaasi wuxuu ahaa cahdi, iyo wacad la dhigtay. Welibana, isla sidii Hoosheeca xaaskiisa uga tagtay ninkeeda, oo aanay daacad ugu ahayn ayaa dadka dembiga lehna ay Ilaah uga tageen. Dadkii la doonayey inay Ilaah u go'aan, oo ay daacad u ahaadaan, ayaa ka tegay markhaati-furkii, weyna ka jeesteen, oo waxay billaabeen inay caabudaan asnaam ay ilaahyo ka dhigteen.

Haddaba, Ilaah xaq buu u leeyahay inuu yiraahdo guurkan, ama heshiiskan waa naxli iyo baadil waanan idin deyriyey. Laakiin, xaqiidii Ilaah waa Ilaaha nolosha, mase ahan Ilaaha dhimashada. Wuxuuna bilaabay inuu tusaale ahaan u isticmaalo lamaanahan kala duwan.

Mid wuxuu soo noolaynayaa xiriirka, oo wuxuu doonayaa inuu soo furto, oo badbaadiyo isla sida Ilaah marar badan u badbaadiyey Israa'iil sida ku qoran kitaabka Axdigii Hore; Welibana wuxuu doonayaa inuu innaga ina badbaadiyo oo aan xiriir wanaagsan la yeelanno.

Xitaa haddaan lunnay, oo aan baadi noqonnay, wuxuu weli doonayaa inuu ina soo furto oo aan isaga ugu soo noqonno si xiriirka aan la leenahay uusan u dhiman ama go'in. Tusaalaha aasaasiga ah ee uu inoogu tusay awooddiisa wax badbaadisa iyo tan nolosha badiiciga ah ayaa waxay ahayd markii uu dadka ka sara kiciyey dhimashadii.

Haddaba awooddiisa wax badbaadisa iyo tan wax noolaysa kala duwanaansho ma leh. Labadaba waa soo noolayn, ama cusboonaysiinta dadka. Tan kalena waa xiriirkii ruux ahaaneed oo dib loo soo noolaynayo, oo dadkana nolol cusub la siinayo.

Waana mid xagga jirka laga dareemayo noloshan cusub ee la helay. Xaqiiqduna waxay tahay inaanu jirin qof u qalma ama shaqaysan kara raallinimada Ilaah. Ma jiro qof dembi leh, aniga iyo adigaba ku daroo, oo oran kara waxay Ilaah u tahay sharaf inaan nahay dadkiisa amase inuu xiriir inala yeesho.

Maahan isaga kan ay sharaf u tahay, oo ku riyaaqaya, laakiin waa innaga kuwa la sharfay, oo mahadcelinta laga dhowrayo. Waa innaga kuwa ku barakoobaya inaan Ilaah xiriir la leenanay. Waxaad garanaysaa in fikirka xiriirkan badbaadada uu iyaga ka soo celiyey dhimashada. Waxaa farxad noo ah kolkii wadaadka kiniisadda ama caawiyayaasha ay lamaanaha guurkooda dhibaataysnaa ay xal u helaan.

Sida marka la cafiyo, oo guurkooda uu ka badbaado burbur. Isla sidaas oo kale, Ilaah wuxuu ku farxaa markii uu soo furto dadkiisa. Erayga furasho, wuxuu ka macne yahay in qofkii mar kale xoriyaddiisii loo soo iibiyey. Xaqiiqdii Hoosheeca ujeeddadiisu sidaas ayey ahayd.

Markii xaaskiisii Goomer ay ka tagtay, oo rag kale ka raacday, ayuu soo raadiyey si mar kale uu u soo ceshado, oo uu dembiga ay ku jirtay uga soo furto. Waxay u muuqataa kaaf iyo kala dheeri dunideenna maanta in qof mar kugu xadgudbay oo kaa tagay, oo khiyaanay ay dib u soo ceshadaan, waxayna leeyihiin,

"Ha igu soo noqon, ee araggaaga iga qari, waxba kugu fali maayee."

Sida xaqiiqda ah, markii aad eegto Qorniinka, inkastoo ayan badnayn, waa laga hadlay maaddada furniinka. Marka la eego sharciga, waa laguu oggol yahay inaad iska furto xaaskaaga. Waxaase Ciise leeyahay, xaaskaaga waxaad ku furi kartaa oo keliya haddii ay gogol dhaaf la timaaddo.

Haddaba maaddada furniinka maahan doonista Ilaah, oo masiixiyiintuna waa inay taas gartaan. Dadka maanta, haddii naagtu ay khiyaamayso, oo rag kale aaddo, waa wax la garan karo haddii la furo. Balse taasi maahan doonista Ilaah, oo la dooni maayo in qofku isla markiiba aan dhaleecayno, oo erinno, oo ismoogaysiino saamaxaadda dadka ina xumeeya. Waa inaynu la nimaadno dabiicad saamaxaadi ku dheehan tahay, oo dib u soo celinno haddii ruuxa dumarka ah ay ka toobadkeento khaladka ay gashay.

Waxaa keliya oo la saamaxayaa haddii qofku uu ka xun yahay wixii uu sameeyey, iyo daacad-darradii, waayo waxaa laynoogu yeeray inaan dadka cafinno, oo xiriirkiina aan dib u soo celinno. Waxaa jira guur badan oo sidaa ku badbaaday, kaddib markii mid ka mid ah lamaanaha is-qaba lagu qabtay gogol-dhaaf. Guurka sidaa loo badbaadiyo wuu ka sii xoog badnaanayaa sidii markii hore uu ahaa, dadkuna ruux ahaan bay u wada jirayaan kaddib markii la heshiisiiyo.

Waxay ka dheeraanayaan khaladaadkii hore ee dhibka u keenay haddii uu mar kale yimaado. Waxay haddaba tani tusaale u tahay waxa Ilaah inaga doonayo. Wuxuu garanayaa in adiguba aadan daacad ahayn, wuxuu kaloo garanayaa inaad adiguba ku dembaabtay doonistiisa, laakiin wuxuu doonayaa inuu kaasoo furto xoogga dembiga.

Bal aan eegno sida ku qoran Warqaddii 1aad ee rasuul Butros 1:17-19 oo ina xusuusinaysa sida furashadayada ay u qiimi badan tahay.

“Haddaad Aabbow ugu yeedhaan kan nin walbaba u xukuma eexashola'aan iyo sida shuqulkiisu yahay, cabsi Ilaah isku dhaafiya wakhtiga aad qariibka tihiin. Waxaad og tihiin inaan dabiicaddiinnii bilaashka ahayd oo aad awowayaashiin ka dhaxasheen laydinkaga soo furan waxyaalaha baabba'aya oo ah sida lacagta iyo dahabka, laakiinse waxaa laydinku soo furtay dhiiggii qaaliga ahaa oo Masiixa oo ah sidii wan yar oo aan wax ceeb ah iyo iin toona lahayn.”

Ilaah ayaa wuxuu wakhti siiyey hadiyaddiisa qaaliga ah ee dadka. Isagu wuxuu bixiyey Masiixiisii markii uu ku dul sicayey iskutallaabta si uu u badbaadiyo xiriirka aynu Ilaah la leenahay. Wuxuu kaloo doonayey inuu noqdo qurbaan, oo silco dabeedna dhinto, si xiriirka aad la leedahay Ilaah loo joogteeyo, si markii weliba aad ku dembaabto Ilaah loo helo saamaxaad, oo haddii aad luntana laguu helo oo aad ugu timaaddo mar kale. Taasina waa sababta kitaabka Axdiga Cusub Ciise uu inoogu boorinayo inaan marka hore doondoonno boqortooyada Ilaah. Markaad sidaas yeesho waxaa dhacaya in aad hesho noloshaada oo xiriirkii Ilaahna dib loo soo celiyo. Ma jiro haddaba wax arrinkaas ka wanaagsan ama dhaafsiisan.

Ma jirto qof aan la badbaadin karin, oo ma jiro ruux dembigiisu ka weyn yahay inuu toobad keeno oo uu u yimaado mar kale Ciise Masiix. Jacaylka Ilaah ayaa ina qaadanaya, oo Ilaahna mar kale ayuu ina aqbalayaa.

Haddaba farriinta nebiga waxay ku saabsan tahay soo noqoshada dadka Ilaah, oo inkastoo xaaska nebigu ay dembi ka gashay isaga, oo ka tagtay, haddana wuxuu u baxay inuu soo celiyo. Taasina waxay sawir u tahay jacaylka Ilaah ee laynagu soo furanayo. Furashaduna maahan mid dunidan ah, laakiin waa mid sii Jiraysa abadan. Waxaa ku qoran qidco aad u qurux badan kitaabka Hoosheeca cutubka 13:14, wuxuuna Ilaah uga hadlayaa dadkiisa, waxaana qoran sidatan:

"Anigu waxaan iyaga ka soo furan doonaa xoogga She'oolka, oo waxaan ka soo badbaadin doonaa dhimashada. Dhimashoy, meeye belaayooyinkaagii? She'oolow, meeday baabbi'intaadii? Toobaddu indhahayga way ka qarsoonaan doontaa."

Marka Ilaah leeyahay, aaway she'oolow baabi'intaadii, iyo marka la leeyahay aaway dhimashoy belaayooyinkaagii, iyo marka la leeyahay toobaddu indhahayga way ka qarsoonaan doontaa, ayaa intaba la isticmaalayaa luuqad sare oo sarbeed ah. Ilaah wuxuu leeyahay qofka toobad-keena wuu iga badbaadayaa.

Waxaana uu ula jeedaa marka la leeyahay, **"Toobaddu indhahayga way ka qorsoonaan doontaa"**, in qofka toobad keena uusan Ilaah wax ciqaab ah saari doonin.

Marka la leeyahay **dhimashoy meeye belaayooyinkaagii**, ayaa waxaa ay u dhacaysaa in dhimashadu ayan lahayn awood ay Ilaah uga hor timaaddo marka Ilaah wax noolaynayo, oo dadka uu ka soo furanayo qabriga. Isla aayadahan ayaa waxay ku qoran yihiin kitaabka Axdiga Cusub.

Iyadoo Masiixa uu soo marayo ayaa Ilaah inaga furan doonaa dembiga iyo dhimashada. Weliban uma oggolaan doono in dhimashadu ay kala qariso isaga iyo dadiisa. Bal aynu eegno warqaddii 1aad ee rasuul Bawlos u qoray dadka reer Korintos 15:1 qayb ahaan, markaasoo uu lahaa: **"Dhimashoy aaway micidaadii."** Waxayna ku dhammaanaysaa ammaan Ilaah lagu ammaanayo wixii Ciise Masiix uu inoogu sameeyey. Marka dhanka kale laga eego, dhimashadu inagama fogayn karto Ilaah. Waana sida Ilaah dareenkiisa qotada dheer ee dadka uu yahay iyo sida uu qof waliba u jecel yahay.

Miyaadan haddaba doonayn haddaba inaad noloshaada siiso Ilaah?

SONG: REEL—CUT--

Waxaa intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale isla idaacaddan) Waxaad waraaqaha noogu soo qortaan P.O. Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: 0707032060.Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Websitekayaga waxaa weeye isna twr360.org. Farriinta waxaad ka hor-marinaysaan Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060